

# ICRC-DA SOOMAALIYA

SI KOOBAN

ICRC

ICRC waxa ay leedahay taariikh soo jireen ah oo taagneyd muddo 40 sano ah oo ay ka jawaab celineysay colaadda iyo gargaar bani'aadamnimo oo ay fidineysay si ay u caawiso dadka Soomaaliyeed. Iyada oo si dhow ula shaqeyneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), ayey ICRC-du sii wadaa in ay caawiso dadka iyo bulshada ay colaadaha hubeysan iyo dhibaatooyinka cimillada soo noqnoqdaahi la dageen. Waxa ay kaloo ka shaqeysaa isku xirka xubnaha qoyska ee kala maqan, sidoo kalena waxa ay ku dadaashaa hubinta ixtiraamka loo hayo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL).

# KA HORTAG/DHOWRID

Dhowridda dadka ay sida xun u saameeyeen colaadaha hubeysan – dadka rayidka ah, kuwa dhaawacmay iyo kuwa xanuunsan, dadka xorriyadoodii laga qaaday – intaba waxaa lagu xusay sharciga caalamiga ah. Sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada waxa uu ka koobanyahay xeerar loogu talo galay in lagu xadido saameynta colaadda hubeysan ay leedahay sidoo kalena looga hortago dhibaatada bani'aadamka. Waxa uu si gaar ah u ilaaliyaa dadka aan ka qeyb aheyn ama aan sii wadi karin dagaalka – sida dadka rayidka ah, kuwa dhaawaca ah iyo kuwa xanuunsan, iyo maxaabiista – waxa uuna xadidayaa aaaladaha iyo qaababka loo dagaallamo.

ICRC-du waxa ay ku dadaaleysaa in ay hubiso in kuwa ku lugta leh dagaalka ay u hogaansamaan waajibaadkooda sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL). Waxa ay si joogto ah u xasuusisaa dhammaan dhinacyada waajibaadka ka saaran in ay hubiyaan in dadka rayidka ah laga ilaaliyo saameynta colaadaha, in la daryeelo dadka dhaawaca ah iyo kuwa xanuunsan, iyo in si bani'aadamnimo leh loo la dhaqmo dadka xorriyaddooda laga qaaday. Waxa aan sidoo kale ku dadaalnaa in aan ka hortagno dhibaatada innaga oo kor u qaadeyna sharciga caalamiga ah ee bai'aadamnimada iyo xeerarka kale ee gundhigga u ah ilaalinta dadka



Abdikarim Mohamed/ICRC

ku jira xaaladaha rabshada leh, innaga oo wadahadal joogto ah la yeelaneyna dhammaan dhinacyada hubeysan, si dhexdooda loogu faafiyo aqoonta sharciga iyo in la hubiyo in lagu daro sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada qorsheynta iyo fulinta howlahooda. Waxa aan sidoo kale gacan siinaa dadka ka soo kabanaya ama yareynaya in ay la kulmaan dhibaato la xiriirta rabshadaha iyo colaadaha.

ICRC-du waxa ay sanado badan ka shaqeyneysay xabsiyada dalka, iyada oo mar walba codkeeda ku biirineysa in dadka xorriyadda laga qaaday loola dhaqmo si bani'aadamnimo leh iyada oo aanan la kala soocin, sidoo kalena aanan loo eegin sababaha loo xiray. Waxa aan wadahadal laba geesood ah oo qarsoodi ah la yeelanaa madaxda xabsiyada waxaanna siinaa taageero farsamo iyo mid muuqda si aan ugu caawinno hagaajinta xaaladda xabsiga iyo daweynta maxaabiista; gaar ahaan waxaan ku dadaalnaa hagaajinta xaaladda nololeed ee dhinacyada baaxadda, iftiinka, nadaafadda, biyaha, cuntada iyo daryeelka caafimaadka iyo hubinta in maxaabiistu dhexdooda xiriir fiican leeyihiin, shaqaalaha xabsiga, qoysaskooda iyo aduunyada kale, iyo in ay helaan wakiil sharci.

# SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSASKA

Inta ay socdaan colaadaha hubeysan, musiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa dadku ay sameeyaan iyo tahriibka, qoysasku badanaa waa ay kala lumaan iyaga oo aan wax war iyo wacaal ah ka helin xubnaha qoyskooda. ICRC-da iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed, iyaga oo adeegsanaya barnaamijka soo celinta xirriirka qoyska (RFL), waxa ay si wada jir ah uga shaqeeyaan sidii loogu dadaali lahaa in la helo dadka ku maqan ama lagu la'yahay musiibo bani'aadamnimo, rabshado iyo colaad, tahriib iyo xabsi; sidii dib loogu xiriirin lahaa dadkii ay jeclaayeen. Shaqadan waxaa ku jira raadinta xubnaha qoysaska, soo celinta iyo ilaalinta xiriirka qoyska, mararka qaar dib u mideynta qoysaska iyo ku dadaalidda in la cadeeyo halka ay ku danbeeyaan kuwa wali la la'yahay. Barnaamijka soo celinta xiriirka qoysku waxa uu ka soo ururiyaa farriimaha wararka qoyska xubnaha ka tirsan eheladooda gudaha iyo dibadda wadanka. ICRC-da ayaa waxa ay sidoo kale u soo saartay dadka Somaaliyeed oo ay kala lumeen eheladooda ee u haajiray Yurub iyo koofurta Afrika, "barnaamijka raadinta wajiga ". Barnaamijkan ayaa u suuro galinaya in ay



sawirradooda ku daabacaan bar loogu talo galay iyaga oo ka rajo qaba in ay eheladooda maqan amaba qof yaqaanaahi arki doono, oo ay dib u dhisi doonaan xiriirkii iyada oo loo marayo shabakad xirfadleyaal tababaran ah oo ka tirsan dhaq-dhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas.

# CAAFIMAADKA

Helitaanka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa wali ah caqabad marka lagu jiro colaadaha hubeysan iyo rabshadaha, qaxa, iyo dhibaatooyinka cimillada. Si gacan looga geysto wax ka qabashada caqabadahan, waxaa jira barnaamijyo badan oo looga gol leeyahay in lagu hagaajiyo caafimaadka iyo ladnaanta shaqsiyaadka, qoysaska iyo bulshada. ICRC-du waxa ay hadda ka shaqeysaa gargaarka deg-degga ah, daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC), daryeelka isbitaallada (sida qaliinka dhaawacyada dagaalka, daryeelka caafimaadka deg-degga ah iyo adeegyo kale) iyo barnaamijyada nafaqada, iyada oo lala kaashanayo ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS). ICRC-du waxa ay ku taageertaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ka shaqeysiinta ilaa 21 xarumood, kuwaa oo 10 ka mid ahi ay adeegyada nafaqeynta siiyaan caruurta 5ta sano ka yar, hooyooyinka uurka leh iyo kuwa nuujinaya, iyo sidoo kale adeegyada tallaalka ee caruurta ka yar 5ta sano iyo haweenka uurka leh. Xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ee Raadeer iyo Gubadley oo Muqdisho ah iyo Farjano oo Kismaayo ah waxa ay sidoo kale daryeel 24 saac ah siiyaan hooyooyinka iyo ilmaha dhasha inta foosha lagu jiro iyo ka dib. ICRC-du waxa ay sidoo kale taageertaa 3 ka mid ah isbitaallada bulshada ee ku yaalla Muqdishu (Keysaneey iyo Madiina), iyo Kismaayo, iyo waliba 1 xarun oo ah xasilinta bukaannada oo ku taalla Kismaayo. Barnaamijka gargaarka deg-degga ah iyo daryeelka isbitaalka ka hor ayaa ka jira dalka oo dhan waxaana ujeedkiisu yahay in la siiyo tababar, taageero iyo awood jawaab-celineed kooxaha kala duwan iyo bulshooyinka. Iyada oo kaashaneysa Ururka Bisha cas ee Soomaaliyeed, ICRC-du waxa ay ka shaqeyneysaa xoojinta awoodda mutadawiciinta, xubnaha bulshada iyo jawaab-celiyeyaasha, iyada oo la siinayo xog, agabka jawaab-celinta iyo xirfadaha gargaarka deg-degga ah si loogu suuro galiyo in ay si waxtar leh uga jawaab celiyaan xaaladaha deg-degga ah.


Alyona Synenko/ICRC




# SUGNAANTA DHAQAALAHA

Xaaladda deg-degga ah ee bani'aadamnimo ee dabada dheeraatay, oo ay wehliso itaal darrada hey'adaha maxalliga ah ee wax ka qabashada baahiyaha jira, ayaa waxa ay keeneysaa in qeyb weyn oo ka mid ah dadku aysan awoodin in ay si joogto ah u daboolaan, baahidooda muhiimka ah. Inta lagu jiro xaaladaha deg-degga ICRC-du waxa ay bixisaa cunto iyo alaabta lagama maarmaanka u ah guryaha si loo hagaajiyo cunnada iyo xaaladaha nolosha. Si loo ilaaliyo oo kur loogu qaado hab-nololeedka, waxaa kale oo ay ICRC-du ku howlantahay mashaariic lagu taageerayo hab-nololeedka sida qeybinta jawaannada carrada ee xakameynta fatahaadaha wabiyada, deeqo wax soo saar oo loo fidiyo beeraleyda, xoolo dhaqatada, kalluumeysatada iyo kuwa shinida dhaqda, iyo sidoo kale howlaha dhaqaalaha yar loogu abuurayo qoysaska ay dumarku hogaamiyaan. ICRC-du waxa ay sidoo kale la shaqeysaa Kooxda Farsamada Beeraha Soomaaliyeed (SATG) si ay beeraleyda uga caawiso hormarinta dhaqamadooda beer falashada iyada oo loo marayo tababarro iyo bixinta qalabka tacbashada beeraha. Caawimaadda waxaa lagu bixiyaa foojarro u dhigma kaash. Intaa waxaa dheer, waxa aan gacan ka geysannaa yareynta nafaqo darrada iyada oo laga hortagayo lana daweynayo caruurta ay nafaqo darradu heyso ee 5ta sano ka yar iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya iyada oo loo marayo barnaamijka Maareynta Isku-dhafan (IMAM) ee Nafaqo darrada ba'an.

# BIYAHA

Sanado colaado iyo dhibaatooyinka cimillada ah sida abaaraha iyo fatahaadaha, ayaa carqaladeeyay helitaanka biyo nadiif ah oo la cabi karo. ICRC-du waxa ay ka shaqeysaa bixinta biyo nadiif ah iyada oo hagaajineysa isla markaana dayactireysa nidaamyada bixinta biyaha, meelaha biyaha roobka lagu keydiyo iyo ceelasha. Waxa ay sidoo kale ka shaqeysaa hagaajinta kaabayaasha guud ee isbitaallada (Keysaneey, Madiina and Kismaayo) iyo xarumaha caafimaadka, iyo sidoo kale xaaladaha nololeed ee maxaabiista ku jira xabsiyada, iyada oo kor loo qaadayo helitaanka biyaha, fayadhowrka iyo korontada. ICRC-du waxa ay sidoo kale ka taageertaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) kor u qaadista dhaqamada ugu wanaagsan ee nadaafadda si looga hortago cudurrada ka dhasha biyaha.


Abdikarim Mohamed/ICRC

# WADASHAQEYN

Istiraatijiyadda wadashaqeynta ICRC-da wax ay ujeedadeedu tahay xoojinta ruuxda iskaashiga dhaq-dhaqaaqa caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas iyo awoodda ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed uu u leeyahay gudbinta adeegyada bani'aadamnimo. Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa ah saaxiibka ugu weyn ee ICRC-da. Iyaga oo ay la jiraan saaxiibada kale ee dhaq-dhaqaaqa, waxa ay si wada jir ah ugu dadaalaan in ay wax ka qabtaan baahida ban'iaadamnimo ee dadka ay saameeyeen colaadaha hubeysan, rabshadaha iyo musiibooyinka, gaar ahaan dhinacyada sugnaanta dhaqaalaha, daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyo barnaamijka soo celinta xiriirka qoyska, iyada oo mid ba mid ka kale xoojinayo doorkiisa iyo awoodiisa.

# U XISAAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

Unugga maareynta qatarta(RMU) waa unug gudaha Ergada Soomaaliya ah oo madax bannaan oo ujeedadiisu tahay hubinta isla xisaabtanka iyo taxadarka ku habboon ee adeegsiga tas-hiilaadka ICRC-da. Barnaamijyada kaalmada dhexdooda, xaqiijinta RMU ee caawinta ka hor iyo ka dib kaliya gacan kama geysato in la ogaado oo laga hortago leexsiga gargaarka, tayo xumida sameynta iyo hirgalinta, laakiin waxa ay sidoo kale door muhiim ah ka cayaaraan ka fogaanshaha saameynta xun ee howlaha gargaarku ay ku yeelan karaan ka faa'iideeystayaasha ama bulshada. RMU waxa ay sameysaa kormeer dhab ah iyada oo adeegsaneysa la taliyeyaal banaanka ah, xarun wicitaan iyo qadka jawaab-celinta cabashooyinka. La shaqeynta ka faa'iideystayaasha inta lagu jiro wareegga barnaamijka ayaa u ogolaaneysa iyaga in ay ka sii warqabaan xuquuqdooda iyo waxa ay leeyihiin taas oo ay kula xisaabtami karaan ICRC-da marka sida ay filayeen la gaari waayo. Nidaamka jawaab-celinta iyo cabashooyinka ee loo maro xarunta xiriirka bulshada waxa uu siiyaa shaqsiyaadka iyo bulshada qaab lagu bixiyo ra'yi celin, ama sidoo kale lagu soo gudbin karo cabashooyin ama codsi xog la xiriirta howlaha ICRC ay ka qabato meelaha ay dagayihiin. ICRC-da waxaa si toos ah looga la xiriiiri karaa nambarka gaaban ee bilaashka (373) ah oo laga heli karo shabakad kasta oo taleefanka gacanta ah oo dalka ka jirta.



Abdikarim Mohamed/ICRC

ICRC-du waxa ay caawisaa dadka Adduunka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha wata, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda dhibtana uga yareyso, iyada oo inta badan la shaqeyneysa saaxiibadeeda Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. ICRC waxa kale oo ay ku dadaaleysaa in ay ka hortagto dhibaatada iyada oo dhiirri galineysa oo xoojineysa sharciga ccalamiga ah ee bani'aadamnimada, sidoo kalena hormuud u noqoneysa mabaadii'da caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

Waxaad naga heli kartaan namabarka gaaban ee bilaashka ah ee **(373)** xog kasta, jawaab celin ama cabasho la xiriirta howlaha ICRC-da.


**Xafiiska ICRC Muqdisho**
Degmada Wadajir
Xaafadda Buulo-xuubey
S.B 700
Muqdisho
Soomaaliya
Email: mog_mogadiscio@icrc.org

**Xafiiska ICRC Garoowe**
Halgan/qeybta A
Lambar guri. 0185
Wadada Jimcaale
Garoowe, gobolka Nugaal
Dowladda Puntland
Soomaaliya
gar_garowe@icrc.org

**Xafiiska ICRC Baydhabo**
Dhabarka dambe siinka Somaphone
Wadada Muqdisho-Baydhabo
Email: bad_baidoa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Kismaayo**
Faanoole isgoyska Qacle
Ka soo horjeedka dhismaha
Sadaam 2
Kismaayo, Soomaaliya
Email: Kis_kismayo@icrc.org

**Xafiiska ICRC Jowhar**
Gudaha xafiiska Bisha Cas ee laanta
Jowhar
Una dhaw laamiga xiriiriya
Jowhar Iyo Mahaday
Jowhar, Hir-Shabelle
Soomaaliya

**Xafiiska ICRC Dhusamareeb**
Wadada ardoofe road,
Gadaasha BCQ hotel
Dhusamareeb, Galmudug
Soomaliya


ICRC


www.icrc.org


© ICRC, August 2019


facebook.com/icrc
twitter.com/icrc_Africa
instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/somalia/


1089 402 10 2024 2000 Bogga hore: Abdikarim Mohamed/ICRC